

## XAYEESIINTA WARBIXINADA

### Maxaa nahay?

**Dawan:** waa warbaahin Soomaaliyeed oo madaxbannaan, dhexdhexaad ah Soomaalida u soo gudbisa wararka dhammaan dhacdooyinka gobolka Soomaaliyeed ee Geeska iyo Bariga Afrika iyaga oo aan ka tageyn kuwa caalamka iyo gobolka.

**Saameyn:** Waxa aan saameyn ku leenahay in ka badan 30 Milyan oo Soomaali ah oo intooda badan ku noolyihiin, **Soomaaliya, Jabuuti, Ethiopia, Kenya** iyo dunida kale daafaheeda.

**Aaminaad:** Hab-tebintena wararka waxay ku saleysan tahay; **Degdeg, xogo muhiim ah, falanqeyn iyo jiheyn ku asteysan maslaxadda guud.**

**Baaxad:** Wakiilladeenu waxay ku sugan yihiin **10 magaalo** oo Soomaaliyeed oo ay ka soo gudbiyaan dhacdooyinka maalinlaha ah, taas oo abuureysa **isku xirnaan** iyo **iska warqab bulsho.**

**Gaaris:** Wararka Dawan ee maalinlaha ah waxa ay tiro ahaan gaarayaan **8-12** war, waxay celcelis ahaan gaaraan **450K – 900K** oo ah isku geynta dhammaan **baraha Dawan.**

## WARARKA DAWAN WAXAY KU BAXAAN



Website



Youtube



Facebook



Instagram



Mobile App




LinkedIn



Tiktok


# Nooca xayeesiimaha Warbixinada dawan

## Intro




Waa muuqaal 5 Secod ah oo ku biillabanaya muuqaalka oo gudbinaya fariinta xayeesiinta oo ay tahay inuu daawado qof walba oo doonayo in uu muuqaalkan daawado. Faa'idooyinka uu leeyahay waa in uusan daawadaha sina uga boodi karin iyo inuu helayo soo jiidashada ugu horreysa.

## L-shape



L-Shabe TV waa xayeesiin u qaabeysan sida xarafka "L" oo ka soo dul baxda muuqaalka, isla markaana lagu beego meelaha ugu xiisaha badan. Waxa ay gudbineysaa fariin cad oo 10 ilbiriqsi ka kooban. Faa'isooyinka ay leedahay waa in daawaduhu u ku qasban yahay inuu arko oo uusan ka gudbi karin. Waxa ay soo jiidaneysaa dareenkiisa oo joojineysaa mar walba oo ay shaashadda la qeybsato nuxurkii uu daawanayay.

## Outro



Waa muuqaal 30 Second ah oo gudbinaya fariin, kuna dhamaanaya u yeeridda iyo hagista daawadaha. Waxa uu la gaar yahay "Call to action" iyo xiriirka shirkadda oo uu muuqaalka ku dhamaanayo. Muddada muuqaalka oo dheer una dhiganto xayeesiin dhameystiran, taas oo wax ka tareysa in si faahfaahsan fariinta loogu gudbiyo.

## Maxay kuu suurtagalineysaa xayeesiintan

- Ogaal-dhis
- Ka war-heyn adeeg
- waxsoosaar & fikrad
- Aqbalaad
- Go'aan gaarid
- libsasho
- Soo laabasho
- Qabatan

## Siyaasadda xayeesiinta

Dhammaan fikradaha, adeegyada iyo wax-soosaarka lagu xayeesiinayo baraha **Dawan** waa in aysan ka hor imaaneynin **diinta Islaamka, dhaqanka Soomaaliyeed** iyo **shuruucda dalalka gobolka**

**Dawan** waxa ay daawadayaasha u muujineysaa in nuxurka xayeesiintu ka madax bannaanyahay nuxurka tebinta, si daawadaha/aqrisatuhu u kala garto.

Dhammaan xayeesiimaha laga sii daayo Dawan kama turjumayaan siyaasadda tifaftirka, saameyna kuma laha hab-tebinteeda.

Hay'ad ama shirkad kasta oo adeegga xayeesiineed ee Dawan qaadaneysa waa in ay ka diiwaan gashaneyn tahay dowlad.

## Sidee loo dalban karaa?

Xirmadan xayeesiinta ah waxaa qaadan karo hal hay'ad oo kaliya.

Muddada ugu yar ee heshiiskan waa 12 bil.

Soo codsashada waxay ku egtahay 30ka Oktoobar 2023.

Heshiiska waxa uu billaabanayaa 1da Janaayo 2023.